**Xasuusnoow inaad codsan karto sharciga degenaanshada joogtada ah intaadan gaarin 19 jir**

## Warbixin ku saabsan helitaanka sharciga deganaanshada joogtada ah iyo dhalashada baasaboorka daanishka.

Lambarka kiiska ee
F2 2024-17817

Nambarka
dukumeentiga ee e
Doc 2024-0315188

Dhalinyaro badan oo si rasmi ah ugu nool Danmark, balse aan haysan baasaboorka Daanish-ka, ayaa codsan kara waxa loogu yeero sharciga deganaanshaha joogtada ah. Sharciga deganaanshada joogtada ahi wuxuu sahardi u yahay, helitaanka dhalashada daaniishka iyo baasaboorka daanishka.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in ay cawaaqibta ay ku yeelan karto fursadahaaga helitaanka sharciga deganaanshada joogtada ah, haddii aadan codsan marka aad u dhexeyso 18 iyo 19 sano jir. Ama haddii, fasalka 9aad iyo 10aad ka dib, ay kugu dhacdo hakad xaga waxbarashadaada ama shaqadaada waqti-buuxa ah. Degmada Copenhagen ayaa sidaas darteed warqadan u soo diraysa si ay ku xasuusiso inaad barato sharciyada oo aad codsato waqti fiican.

Sharciga deganaanshaha joogtada ah
Shuruudo debecsanaan badan ayaa lagu dalbanayaa helitaanka sharciga deganaanshada joogtada ah haddii aad xasuusato inaad codsatid inta aad u dhexeyso 18 iyo 19 sano jir.
Waxaad ka akhriyi kartaa sharciyada codsiga sharciga deganaanshaha joogtada ah halkan(her). Ogsoonow inaad soo diri karto codsigaaga ugu horayn saddex bilood ka hor intaadan gaadhin 18jir iyo ilaa hal maalin ka hor intaadan gaadhin 19jir.

Rådhuset
1599 København V.

Taleefanka
3366 2000

www.kk.dk

Dhalashada baasaboorka daanishka
Markaad hesho sharciga deganaanshaha joogtada ah, waxaad codsan kartaa dhalashada Daanishka. Halkan waxaa ah, waxyaabo kale, oo muhiim ah in la ogaado in ay jirto, sida  shuruuda ah in codsaduhu uu haysto shaqo iyo in codsaduhu aanu gelin noocyada dembiyada qaarkood. Tusaale ahaan, marka hore suurtagal ma aha inaad hesho dhalashada Daanishka haddii lagugu xukumo xabsi. Waxaad ka akhriyi kartaa wax badan oo ku saabsan sharciyada dalbashada dhalashada daanishka halkan(her).

Caawinaad iyo hagid
Waxaad la xidhiidhi kartaa Adeegga Qaybta Gudoonka Socdaalka, haddii aad wax su'aalo ah ka qabto codsiga sharciga deganaanshada joogtada ah. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa wasaaradda socdaalka iyo isdhexgalka haddii aad qabto su'aalo ku saabsan codsashada dhalashada Daanishka.
Waxa kale oo aad talo waydiisan kartaa la taliyaha waxbarashada ee waxbarashada dhalinyarada. Haddii aadan xasuusan cidda horjoogahaagu yahay, waxaad ka heli kartaa kormeerahaaga_linkigan: Uno Ung

Kobanheegan waxa kale oo jira ururo badan oo madax-banaan, oo caawiya dhalinyarada raba inay codsadaan sharciga deganaanshada joogtada ah iyo/ama dhalashada baasaboorka daanishka. Waxaana ka mid ah:

- Ururrka Fisken
- Qorshaha Guud ee Guriyeynta Amagerplanen
- SR Gargaarka

Caawinadan waxaa badanaa bixiya tabarucayaal,  kuwaas oo kugu caawinaya wakhtigooda iyo aqoontooda inta ay kuu awoodaan[i].

[i] Ururada aan kor ku soo sheegnay waa ka madax banaan yihiin degmada Kobanheegan